

# Xaquuqahaaga markii aad ku jirtid saldhiga booliska

HAGIDA CARRUURTA IYO DHALINYARADA


**Buug-yarahaan wuxuu ku siinayaa warbixin muhiim ah oo ku saabsan xuquuqdaada marka aad joogto saldhiga booliska.** Xuquuqaha waa xoriyadaha iyo taageerooyinka oo aan dhammaanteen qabno oo ay ku illaalsanyihiin sharciga. Carruurta ka hooseyso 18 sanno jirka waxay ku leeyihiin xuquuqo kala duwan dadka weyn, marka buug-yarahaan ayaa sharaxayo xuquuqda aad leedahay.

**Ogaanshaha iyo fahamka xuquuqahaaga ayaa kaa caawin karo garashada markii si cadaalad ah laguula dhaqmo.** Booliska waxay leeyihiin waajibaadka lagaaga illaaliyo waxyeelo oo aad ku daryeeshid fayo qabkaaga inta aad joogtid saldhiga booliska, xittaa haddii ay hayaan cadeyn soo jeedineyso in laga yaabo inaad sameysay wax dhibaato sababo.

**Fadlan u aqri buug-yarahaan sida ugu dhaqsaha badan ee aad awoodo.** Waxay kaa caawineysaa inaad go'aano gaarto markii aad joogtid saldhiga booliska. Qofka ku siiyo buug-yarahaan ayaa kugu siinayo caawimaad aqrinta iyo fahamka. Waxay sidoo kale ku weydiinayaan haddii aad jeclaan laheyd nooc ka duwan ee buug-yarahaan sida mid ku qoran luuqad kale ama mid fudud in la aqriyo.

1. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sababta booliska ay kuugu hayaan saldhiga booliska.


2. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sababta booliska ay kuu keenaan saldhiga booliska.



3. Waa inaad booliska siisaa magacaaga, ciwaankaaga, taariiqda dhalashada iyo dhalashadaada haddii aad kuwaan taqaanid. Kuwaan waa su'aalaha kaliya ee ah inaad ka jawaabtid. **Waxaad xaq u leedahay inaad ka jawaabin su'aalo kale.**

4. **Waxaad xaq u leedahay in qof uu kuu sheego inaad joogtid saldhiga booliska.** Booliska wuxuu ku weydiinayaa haddii aad jeclaan laheyd inaad qof u sheegtid inaad halkaan joogtid. Tan waxay noqon kartaa qof ku jiro qoyskaaga, lamaanahaaga, daryeelahaaga, saaxiibkaaga ama qof kasta oo kale oo aad taqaanid. Waxaa laga yaabaa inaan lagu ogolaan inaad la hadashid iyaga. Haddii aad ka yar tahay 16 ama aad ku jirtid amarka kormeerka qasabka ah waxaad xaq u leedahay in qof kula joogo saldhiga booliska. Waxaad xaq u leedahay in waalidkaaga ama masuulkaaga kugu soo booqdaan saldhiga booliska.

5. **Waxaad xaq u leedahay inaad yeelatid qareen ee kuu sheego inaad joogto saldhiga booliska.** Booliska waxay ku weydiinayaan haddii aad jeclaan laheyd inay u sheegaan qareen inaad joogtid saldhiga booliska. Kan ayaa noqon karo qareen adiga kuu gaar ah ama qareen markaa laguugu waco qareenka kale ayaa lagu diyaarinayaa. Tan waa bilaash.



6. **Waxaad xaq u leedahay inaad si gaar ah ula hadashid qareen waqti kasta.** Tan waa bilaash.

7. **Waxaad xaq u leedahay inuu qareen kula joogo haddii boolisku ku wareysanayo.** Tan waa bilaash.

8. **Haddii aad ka yar tahay 16, qareen waa inuu xaadir ahaadaa markii uu booliska ku wareysanayo ilaa midaan ay qof halis gelin karto.** Haddii aad tahay 16 ama 17 oo aad ku jirtid amarka kormeerka qasabka ah, qareen waa inuu joogaa marka booliska ku wareysanayaan ilaa ay jiraan xaalado gaar ah.

10. **Waxaad xaq u leedahay cunto iyo cabitaan.** Biyo ayaa lagu siinayaa. Waxaa lagu siinayaa cunto haddii aad joogtid saldhiga booliska in ka badan afar saacadood. Booliska waa inay ku weydiyaan haddii aad qabtid baahiyaha cuntada qaaska ah sida ugu horeysa ee suurtoogalka ah.

9. **Waxaad xaq u leedahay caawimaad caafimaad haddii aad jiran tahay ama aad dhaawacantahay.** Tan waxaa ku jira caawimaada caafimaadka dhimirka. Booliska waxay ku weydiinayaan su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga iyo faydo qabkaaga si ay kaaga caawiyaan hubinta in si ku habboon lagu daryeelo intaad ku jirto saldhiga booliska. Waa muhiim inaad booliska u sheegto haddii aad qabtid xaalad caafimaad oo laga yaabo inay ku saameysa markaad joogtid saldhiga booliska. Booliska waxaa laga yaabaa inay ku weydiyaan in kalkaalisoo ama dhaqtar ku eego. Tan ayaa waxay ka caawineysaa hubinta in si ku habboon lagu daryeelo intaad joogtid saldhiga booliska. Booliska waa inay ku weydiyaan haddii aad u baahan tahay inaad la hadashid dhaqtar, kalkaaliye, ama xirfadle kaloo caafimaad.

# Hagid badan...

## **Haddii aad u baahan tahay caawin dheeraad ah**

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato caawin si aad u fahamtid waxa dhacaya markaad joogtid saldhiga booliska. Haddii aad 16 sanno jir tahay ama aad ka weyn tahay, caawintaan waxay ka imaan kartaa qof taageero tababaran ee loo yaqaan Qof weyn ee ku Haboon. Tan waxaa laga yaabaa in loo baahdo haddii aad qabtid curyaanimada waxbarashada ama arin caafimaadka maskaxda ah. Haddii booliska ay u maleeyaan inaad caawinta Qofka weyn ee ku Haboon u baahantahay, waxay kuU helayaan mid, xitaa haddii aadan weydiisan.

## **Helitaanka turjumaan ku caawiya**

Waa muhiim in aad fahmi karto waxa saldhiga booliska laga sheegayo. Haddii aadan ku hadlin ama fahmin af Ingiriiska, booliska waxay kuU helayaan qof ku hadla luuqadaada inuu ku caawiyo. Qofkaan waxaa loo yaqaan turjubaan. Tan waa bilaash.

## **Caawin ku helida xiriirka**

Dad badan ayay ku adkaataa inay fahmaan waxa ka dhacaya saldhiga booliska. Booliska waa inay ku weydiiyaan haddii aad u baahantahay caawin ama aadan waxba ka hubin. Waa inay kugu siiyaan caawimaad aqrinta haddii aad u baahantahay. Haddii aad dhagool tahay ama aad dhibaato ku qabtid inaad si cad u hadashid, booliska waxay kuu helayaan qof ku caawiya. Tan waxay noqon kartaa turjumaan BSL ama xirfadle kale oo ku haboon. Tan waa bilaash.

## **Haddii aadan Biritish aheyn**

Haddii aadan aheyn muwaadin Biritish ah, booliska waa inuu kuu soo bandhigaa inaad la xiriirto Wakiilka Wadankaaga, Safaarada ama Qunsuliyada, si aad ugu sheegto meesha aad joogto iyo sababta aad saldhiga booliska u joogtid. Qof ayaa markaa si gaar ah kuugu soo booqan kara oo kuu diyaariyo qareen ku arko.

## **Maxaa dhacaya haddii laguugu soo oogo ama laguugu keeno saldhiga booliska amar damaanad?**

Haddii laguugu soo oogo dembi, waxaa laga yaabaa in lagu ogolaado inaad baxdo ama waxaa laguugu hayn karaa saldhiga booliska oo lagu geeyo maxkamad maalinta xigta oo suurtoogalka ah. Haddii laguugu keeno saldhiga booliska amar damaanad, waa lagu hayn karaa oo waxaa lagu geyn karaa maxkamada maalinta xigta ee suurtoogalka ah. Xaaladaha qaarkood, waxaa lagu ogolaan karaa inaad guriga aadid.

## **Illaa intee ayaa laguugu hayn karaa xabsiga?**

Booliska waxay kugu hayn karaan xabsiga illaa 12 saacadood iyaga oo aan dembi kugu soo oogin. Booliska waxay midaan ku kordhin karaan ugu badnaan 24 saacadood, laakiin waa haddii sarkaal sare oo boolis ah uu taas ogolaado. Waxaad xaq u leedahay inaad fikradaada ka dhiibato go'aankaan, ama waxaad dooran kartaa in qareenkaaga uu booliska kaala hadlo.

## **Helitaanka aragtida waraaqaha**

Qoraalka cadeynta ee dacwada ayaa lagu siinayaa adiga ama qareenkaaga, haddii dacwadaada ay aado maxkamada. Midaan ayaa u ogolaaneyso in adiga ama qareenkaaga u diyaargarowdaan difaacaaga. Waxaad xaq u leedahay in warbixintaan la tarjumo, ama ugu yaraan qeybaha ku haboon ee waraaqaha muhiimka ah haddii aadan fahmin af Ingiriis.

# Hagid badan...

## Warbixinta ku saabsan xaquuqda helitaanka ee qareenka

- Booliska waxay ku weydiinayaan haddii aad rabtid inaad la hadashid qareen. Booliska waxay kula xiriirinayaan qareen sida ugu dhaqsaha badan ee suurtoogalka ah.
- Waxaa lagu ogolyahay inaad wadahadal gaar ah la yeelato qareen waqti kasta. Tani waxay noqon kartaa taleefon, ama waxay kugu imaan karaan oo ay kugu arki karaan saldhiga booliska.
- La hadalka qareenka waa wax caadi ah, oo kaama dhigeysa inaad sameysay wax qalad ah.
- Shaqada qareenka waa inuu illaaliyo xuquuqdaada oo uu ku siiyo tallo sharciga ku saabsan.
- Waxaad dooran kartaa inaad la hadashid qareen aad taqaanid ama qareen uu booliska kuu diyaarin karo si aad ula hadashid – qareenka waxaa loo yaqaan qareenka wacitaanka. Qareenka wacitaanka waa mid madax banaan oo uma shaqeeyo booliska.
- Haddii booliska ku wareysto, waxay ku weydiinayaan haddii aad jeclaan laheyd qareen inuu qolka kugula jiro markii midaan ay dhaceysa.
- Booliska caadi ahaan looma ogola inay ku wareystaan qareen la'aan haddii aad codsatay qareen inuu qolka kula joogo.
- Waad ka laaban kartaa inaad qareen la hadashid oo waxaad dalban kartaa qareen xili kasta. U sheeg booliska sida ugu dhaqsaha badan oo suurtoogalka ah waxayna kula xiriirinayaan qareen.
- Haddii qareenka uusan imaan saldhiga booliska markii ay dhaheen waan imaaneynaa, ama aad u baahan tahay inaad mar kale la hadashid qareen, waxaad weydiisan kartaa booliska inay mar kale la xiriiraan isaga ama iyada. Booliska wax awood ah kuma laha marka uu qareenka imaado saldhiga marka ay la xiriiraan kadib. Booliska waxay la wadaagi karaan fikradahaaga iyo rabitaankaaga qareenka haddii aad rabtid.

## Xaquuqdaada aad ku cabatid

- Waxaad xaq u leedahay inaad ka cabato sida booliska kuula dhaqmeen.
- Haddii aad ka cabatid Booliska Scotland midaan kaama dhigeysa qof xun.
- Waxaad sameyn kartaa cabasho markii aad xabsiga ku jirto.
- Haddii aad rabtid inaad cabasho gudbisid adigoo ku jiro xabsiga, weydii inaad la hadashid baaraha ama qof darajo sare leh.
- Haddii aad rabtid inaad cabasho gudbisid markii lagu siidaayo kadib, waxaad aadi kartaa saldhig kasta oo boolis ah.
- Haddii uu sarkaal boolis ku waxyeelleeyay ama dhaawacay markii lagu xeraayay ama aad ku jirtay xabsiga booliska waa inaad ka dacwootaa Waaxda Heerarka Xirfadlaha Booliska Scotland.
- Si aad u dacwooto soo wac 101 ama aad saldhiga booliska deegaankaaga.
- Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa qof kale inuu kuu dacwoodo. Waxay noqon karaan waalid, saaxiib, lammaane ama qof aad ku kalsoon tahay. Waxaad u baahan tahay inaad siiso oggolaanshahaaga oo qoraal ah.

Buug-yarahaan waxaa si wadajir ah u soo saaray xubno ka tirsan STARR, oo ah goobta kaliya ee Scotland ee loo qoondeeyay dadka qibrada u leh daryeelka sugan, oo kaashanayo Xarunta Cadaaladda Carruurta iyo Dhalinyarada (CYCJ) iyo Dowladda Scotland. 'Xaquuqdaada cabasho' waxaa la waafajiyay People First Scotland.

Wixii warbixin dheeraad iyo taageero ah booqo [justtherightspace.org](https://www.justtherightspace.org)

© Crown copyright 2023